

Dib ugu noqoshada Talaabada 1aad ee xayiraadaha KOOFID-19

Abriil 06, 2021

Alberta waxay dib ugu laabanaysaa Talaabada 1aad ee qaab dhismeedka afarta tallaabo ah si loo ilaaliyo nidaamka caafimaadka loona yareeyo kororka faafitaanka KOOFID-19 ee Gobolka.

Dhaqan galaya 11:59 pm Abriil 6, tallaabooyinka caafimaad ee lama huraanka ah ee la cusbooneysiisay waxay u dhaqan galayaan sida, jir dhiska iyo waxqabadyada howlaha. Laga bilaabo duhurka Jimcaha, Abriil 9, makhaayadaha waxaa laga xadidi doonaa inay bixiyaan oo keliya qaadashada, geyn iyo adeegga barxadda.

Alberta waxay ku sii jiri doontaa Tallaabada 1 iyadoo xaddidaadda makhaayadaha illaa ogeysiis dambe. Saraakiisha caafimaadku waxay sii wadi doonaan inay si dhow ula socdaan faafidda KOOFID-19 si loo qiimeeyo in tallaabo dheeri ah loo baahan yahay si loo yareeyo gudbinta.

“Waxaan qaadeynaa tallaabo adag si aan u joojino mowjadaha seddexaad ee qatarta ku ah nidaamkeena caafimaad iyo caafimaadka kumanaan oo reer Alberta ah. Kororka degdegga ah ee kiisaska, gaar ahaan noocyada walaaca, waxay ka dhigaysaa waqtigan muhiimka ah ee lagu joojinayo faafitaanka. Tallaabooyinkan waxay nasiin doonaan waqti aan tallaallada dheeraadka ah ee KOOFID-19 ay noogu yimaadaan oo u dhaqan galaan si aan mar kale ugu bilowno inaan si ammaan ah u qafiifinno xayiraadaha sida ugu dhakhsaha badan.”
Jason Kenney, Gudoomiyaha

“Faafitaanka noocyada kaladuwan ee sii kordhaya waxay ka dhigan tahay inaan qaadno tallaabooyin adag si aan u ilaalino awooda nidaamka caafimaadkeena una badbaadino noloshu. Tallaabooyinkan cusub ee lama huraanka ah ee caafimaadka ayaa loo baahan doonaa oo keliya muddo gaaban si aan u tallaalno dadka reer Alberta sida ugu dhakhsaha badan.”
Tyler Shandro, Wasiirka Caafimaadka

“Waxaan aad uga walaacsanahay kororka ee kiisaska KOOFID-19 ee Alberta. Dhamaan reer Alberta waa inay qaadaan tallaabooyinkan dheeraadka ah si dhab ah; feyraskan ayaa ah mid aad u faafa. Kaliya markaan wada shaqeyno ayaan is ilaalin karnaa, yareyn karnaa faafitaanka isla markaana ilaalin karnaa nidaamkeena caafimaad.”
Dr. Deena Hinshaw, Madaxa caafimaadka ee caafimaadka

Tallaabada 1aad ee Xaddidaaddaha

Tallaabooyinka soo socda ee lama huraanka ah ee caafimaadka dadweynaha ayaa dhaqan galaya 11:59 pm.

Abriil 6:

Dukaamada

- Adeegyada tafaariiqda waa inay yareeyaan tirade macaamiisha illaa 15 boqolkiiba degganaanta lambarrada dabka, uguyaraanna shan macmiil ayaa loo oggol yahay.
 - Ka qaadashada jidka dinaciisa, geynta adeegyada khadka tooska laga iibsado waa la dhiirigelinayaa.
- Goobaha laga dukaameysto ayaa ku koobnaan doona boqolkiiba 15 degganaanta lambarrada dabka.

Jimicsiga gudaha

- Kaliya tababar halka qof ah ama qoys ayaa loo oggol yahay waxqabadyada jimicsiga gudaha (tusaale ahaan, jimicsiga istuudiyaha qoob ka ciyaarka, tababbarka barafka, casharrada qof qofka ah).
- Majiraan iska imaanshaha goobaha jimicsiga ama jirdhis gaar ah oo aan la ilaalinayn.
- Jimicsiga kooxda, dadka badan amaba yar ama, lama oggola.
- Jimicsiga bannaanka waxaa loo oggol yahay ilaa 10 qof, haddii kala fogaanshaha jirka la ilaalinaayo inta u dhexeysa qoysaska.

Hawlaha dadka waaweyn

- Hawlaha dadka waaweyn lama oggola. Waxqabadyada waxaa ka mid ah qoob ka ciyaarka, heesaha, jilitaanka, muusigga iyo waxqabad kasta oo jimicsi ama bandhig masraxa ah.

Tallaabooyinka soosocda ee lama huraanka ah ee caafimaadka bulshada ayaa dhaqan galaya duhurkii Jimcaha, Abriil 9:

Makhaayadaha, baararka, iyo goobaha shah cabka

- Adeegga gaarka oo gudaha ah lama oggola
 - Dibad u qaadashada, ka qaadashada jidka dhinaciisa iyo adeegyada geynta waa la oggol yahay.
 - Ku cunidda bannaanka waa la oggol yahay. Miisaska iyo daashashka dibadda ku yaala waa inay u dhexeeyaan laba mitir ama u kala dhexeeyaan qeybiye aan la mari karin oo ka hortageya gudbinta dhibcaha.
 - Xubnaha qoyska kaliya, ama laba xiriir u dhow oo qof kaligiis nool yahay.
 - Xogta la xiriirka waa in laga soo ururiyaa hal qof oo ka mid ah dadka wada cunteynaaya.

Tallaabooyinka soosocda ee qasabka ah ee caafimaadka bulshada wali wax isbadal ah kuma imaan:

Goobaha cibaadada

- Dhammaan goobaha cibaadada waxay ku sii koobnaan doonaan boqolkiiba 15 ee deggenaanta lambarrada dabka ee imaanshaha qofka.
 - Bixinta adeegyada arragga khadka tooska ah ee internetka ayaa si xoog leh loo dhiirrigelinayaa.
 - U adeegga dadka iyagoo aysan ka tagin gawaaridooda oo ay u hoggaansamaan hagista waa la oggol yahay oo aan lagu soo rogin xaddidaadda kooban.

Kulamada bulshada

- Kulamada bulshada ee gudaha ayaan la oggoleyn.
- Isu imaashaha bulshada ee dibada waxay ku egtahay 10 kaqeybgalayaal, iyadoo la ilaalinaayo kala fogaanshaha jirka iyo tallaabooyin kale oo la sii wado.

Adeegyada gaarka ah iyo fayoaqabka

- Adeegyada gaarka ah iyo fayoaqabka waxay u furnaan karaan ballan keliya. Tan waxaa ka mid ah meelaha timaha lagu qurxiyo, meelaha lagu qurxiyo cidiyaha, duugista, cillaanka iyo daloolinta jirka.
- Adeegyada caafimaadka, oo ay ku jiraan jimicsiga jirka ama isku daaweynta irbidaha jirka, adeegyada bulshada ama ilaalinteeda, hoyga dadka nugul, adeegyada gurmada, daryeelka carruurta, iyo madbakhayada bulshada ee aan macaash doonka ahayn ama jikooyinka samafalka ah ayaa u furnaan kara kaqeybgalka gaarka ah.

Ciyaaraha iyo waxqabadka carruurta ee gudaha iyo dibadda

- Dugsiyada Xanaanada ilaa fasalka 12aad (K-12) iyo ciyaaraha iyo waxqabadka carruurta dugsiya sare kadib, sida casharada waxbarashada jir dhiska, ayaa hadda isticmaali kara aagagga ka baxsan si ay u taageeraan waxqabadyada waxbarashada ee la xiriira manhajka.

- Casharada, waxqabadka iyo howlaha shuruudaha saaran, laakiin ma ahan ciyaar, waxaa laga yaabaa inay ku dhacaan isboorti / dhaqdhaqaaqyo yaryar oo kooxda ku saleysan iyo ciyaaraha fudud ee dugsiiga.
 - Dhamaan kaqeybgalayaasha waa inay ahaadaan 18 sano ama kayar, marka laga reebo tababarayaasha.
 - Ugu badnaan 10 qof, oo ay ku jiraan dhammaan tababarayaasha iyo kaqeybgalayaasha.
 - Ka qaybgalayaasha waa inay jir ahaan iska kala fogaadaan mar walba.

Qiyaasaha ku saleysan kiisaska iyo koritaanka, oo ay ku jiraan noocyada 'KOOFID-19', ayaa la kormeerayaa waxaana sidoo kale loo isticmaali doonaa in lagu hago go'aan kasta oo ku saabsan baahida loo qabo in la joojiyo tallaabooyin dheeri ah ama suurtagal ah in la kordhiyo xaddidaadaha.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka iyada oo tilaabooyin sax ahna loo marayo, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xogta la xiriirtaa

- Tallaabooyinka caafimaadka bulshada ([Public health measures](#))
- Habka loo socdo (qaab ah afar talaabo) ([The Path Forward \(four step framework\)](#))

Warbaahinta kala duwan

- Daawashada shirka warfaafinta ([Watch the news conference](#))
- Arag dhacdooyinka sawirada (waxaa la heli doonaa dhacdada kadib) ([View the event photos](#) (*will be available after the event*))

Weydiimaha warbaahinta

[Jerrica Goodwin](#)

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Premier

[Tom McMillan](#)

780-422-4905

Kaalayaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

Si aad u hesho ilaha la tarjumay ee dowladda, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.